



Taariikh: 28/08/2018

**WAR-SAXAAFADEED**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane Muuse Biixi Cabdi, waxa uu wareegto madaxweyne oo summadeedu tahay **JSL/XM/WM/222-184/082018**, uu dib-u-habayn ku sameeyey Ciidanka Ilaalada Cashuuraha ee loo yaqaan (Turbataariyada)

**Waxaanay u dhignayd Wareegtada Madaxweynuhu Sidan:-**

**Wareegto Madaxweyne**

**Dib-u-habaynta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha (Turbataariyada)**

- Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay:** Ahmiyadda Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu u Leeyihiin Kobcinta Dhaqaalaha iyo Dar-dar-galinta Dakhli Uruurinta Dalka;
- Markaan Xaqiiqsaday:** Muhiimadda Dib-u-habaynta Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu u leeyihiin Qaranka;
- Markaan Helay:** Talo-soo-jeedinta Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda ee ay khusayso;

**Waxaan Go'aamivey;**

- 1) In laga bilaabo taariikhda maanta dib u habayn lagu sameeyo Ciidanka Ilaalada Cashuuraha (Turbataariyada), kuwaas oo noqon doona qayb ka tirsan Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana hoos tagi doona Taliska Guud ee Ciidanka Booliska.
- 2) In Taliyaha Ciidanka Boolisku isku-beddel ku sameeyo Ciidanka Ilaalada Cashuuraha lixdii biloodba hal mar, isla markaana la siiyo tababar ku saabsan nidaamka ilaalinta cashuuraha, tacriifadaha badeecadaha, wada-shaqaynta maamulka goobta cashuur-qabashada iyo asluubta la-dhaqanka cashuur bixiyaha.
- 3) In Ciidanka Ilaalada Cashuuraha laga dhigo kuwo leh ugu yaraan aqoon dugsi sare iyo ammaano dhab ah, laguna soo xulo karti iyo hufnaan.

**ALLAA MAHAD LEH**

**Muuse Biixi Cabdi**  
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**